

# Aqoonsiga Waalidnimo ee Raaliga Laga Yahay ee Minnesota

## Ujeedada

Saxiixidda foomkan Aqoonsiga Waalidnimo (Recognition of Parentage - ROP) waxay aasaastaa xiriir ka dhexeeya aabbaha iyo caruurta marka uusan aabbaha dhabta ahi qabin caruurta hooyadood. Saxiixidda foomkan:

- Waxay si sharci ah u aasaastaa cilaaqaadka aabanimo ee aabbaha dhabta ah.
- Waxa ay dhisaysaa xuquuqda iyo masuuliyadaha qaarkood ee ku aaddan hooyada, aabbaha iyo caruurta
- Waxaa lagu oggolaanaya in aabbaha magaciisa lagu daro diiwaanka dhalashada
- Waxay salaysaa jiritaanka masruufka caruurta
- **Ma aasaasto haynta ama booqashada waalidka.**

## Tilmaamaha Waalidiinta

Inta aadan saxiixin foomkan su'aalaha aad qabtid jawaabo u hel. Saxiixidda foomkani waa mid raali laga yahay. Haddii aadan hubin qofka ah aabbaha dhabta ah, waa in aadan saxiixin dukumiintigan waana in aad samaysaa tijaabada unugyada dhaxalka. Si aad u samaysid tijaabada unugyada dhaxalka, la xiriir shaqaalaha masruufka caruurta ee degmadaada ama iskaa u raadso adeegyada tijaabada unugyada dhaxalka. Labada waalidba waa ka noqon karaan ama burin karaan Aqoonsiga Waalidnimo haddii waalidkaasu ka noqoshadaas oo qoraal ah laguna saxiixay nootaayo dadweynaha horteeda lagana xereeyay Waaxda Caafimaadka ee Minnesota, Xafiiska Diiwaanka Muhiimka (Minnesota Department of Health, Office of Vital Records) 60 maalmood gudahood ka dib markii la saxiixay Aqoonsiga Waalidnimo. 60 maalmood ka dib, Aqoonsiga Waalidnimo oo si buuxda loo fuliyay loona xereeyay wuxuu la awood yahay amar maxkamadeed oo sugaya aabanimo. Marka la diiwaan geliyo, Waaxda Caafimaadku waxay diiwaanka dhalashada ku qoraysaa magaca aabbaha.

Haddii adiga qiyaarka aad ku dhisaysid jiritaanka cilaaqaad sharci ah ee ka dhaxeeya aabbaha iyo caruurta marka aabbaha aanu ahayn ninka qaba caruurta hoyadooda:

- Affarta bog ee foomkan iyo bugga yar si fiican adiga u aqriso ama qof adiga ha kuu aqriyo Ahaanshaha Aabbaha Sharciga: Macluumaadka waalidnimo ee hooyooyinka iyo aabbayaasha (Being a Legal Father: Parentage information for mothers and fathers) (DHS-3159A-SOM)
- Daawo fiidiyaha ku saabsan sida loo sugo aabanimada
- Haddii hooyada uu qabay qof aan ahayn aabbaha dhabta ah ee caruurta, hooyada saygeedu waa in uu isna saxiixaa isaga oo soo gudbinaya Caddayn in Saygu Aannu Waalid Ahayn (Spouse's Non-Parentage Statement) isaga oo ka diiwaan gelinaya Waaxda Caafimaadka ee Minnesota
- Foomkan oo dhan ka buuxi macluumaad saxan oo la mida kan warqadda dhalashada ee caruurtaada
- Haddii wax qaldan aad ku qortid foom cusub weydiiso. Erayada qalinka ha marin, meelaha bannaan ha ka tagin ama saxitaan ha samayn.
- Foomkan ku hor saxiis nootahaya
- Foomkan oo dhammaystiran ka xarayso Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (Minnesota Department of Health).

**Marka aad foomkan saxiixdid, waxaa kale ee aad baddalaysaa macaga dambe ee canuggaaga kaaso ka duwan kan warqadda dhalashada ku yaalla.** Haddii aad doonasid in aad baddashid magaca dambe labada waalidna ay raalli ka yihiin, ku qor magaca dambe ee canuggaaga bokiska loogu talagalay. Haddii aadan rabin in aad baddashid magaca dambe ama canuggaaga xogtiisa ku taalla warqadda dhalashada aan weli la xarayn, canuuggaga magaciisa dambe ee uu hadda ku socdo bokiska ku qor.

## Tilmaamaha hay'adaha caawinaya

- Sii waalidka ogaysiis afka ah oo ku saabsan xuquuqdooda, mas'uuliyadooda iyo waxa kale oo ay samayn karaan oo ka duwan saxiixidda Aqoonsiga Waalidnimo.
- Dhammaystiridda qaybta Hay'adda ee ku taalla halka hoose ee Aqoonsiga Waalidnimo oo dhammaystiran adiga oo qalinka marinaya bokiska kuna qoraya magaca hay'adda halka foomka lagu dhammaystiray.
- Fakis ama boostada foomka ugu dir Waaxda Caafimadka ee Minnesota.
- Waalid kastaba waxa aad siisaa koobiga foomka iyo waxa aad reebata asalka ama koobiga ee aad xog ahaan u haysanayso.
- Waxa aad raacda qawaaniinta iyo nidaamyada hayaddaada si aad ula xariirtid waalidka in ay saxiixaan iyo ka xaraystaan foomka cusub haddii aad adiga ka warhesho in foomka Waaxda Caafimadka ee Minnesota laga soo diiday.

## Foomkan dhammaystiran fakis ugu dir 651-215-5834.

Haddii aadan awoodin in aad fakis ugu dirtid foomkan, boostada ugu dir:

(Waaxda Caafimaadka ee Minnesota)

(Xafiiska Diiwaanada Muhiimka)

Minnesota Department of Health

Office of Vital Records

P.O. Box 64499

St. Paul, MN 55164-0499



Si aad macluumaadkan ugu hesho qaabab kale oo aad isticmaali karto iyo helitaanka loo simanyahay ee adeegyada aadanaha oo dheeri ah, qoraal u dir [DHS.Info@state.mn.us](mailto:DHS.Info@state.mn.us), wac 651-431-4400, ama iticmaal adeega lalinta ama isgaarsiinta wararka ee aad doorbideyso. ADA1 (2-18)

# Aqoonsiga Waalidnimo ee Raaliga Laga Yahay ee Minnesota

<b>Cunug</b>	MAGACA HORE	MAGACA DHEXE	MAGACA DAMBE	DARAJADA (Jr., Sr., I, II, iwm.)	
	TAARIKHDA DHALASHADA	GOOBTA DHALASHADA(magaalada/gobolka)			
	<b>Ma rabtaa in aad bedesho magaca dambe ee ilmahaaga?</b> <input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya Haddii ay haa tahay, sanduuqa midigta xiga ku qor magaca danbe ee cusub. Haddii ay maya tahay, sanduuqa midigta xiga ku qor magaca dambe ee hadda.			MAGACA DAMBE EE ILMAHA	
<b>Hooyada</b>	MAGACA HORE	MAGACA DHEXE	MAGACA DAMBE	DARAJADA	TAARIKHDA DHALASHADA (mm/dd/yyyy)
	GOOBTA DHALASHADA(magaalada/gobolka)		LAMBARKA SOOSHAL SIKUURADKA	LAMBARKA TALEFOONKA (ikhtiyaari)	
	CINWAANKA BOOSTADA		MAGAALADA	GOBOLKA	LAMBARKA BOOSTADA
	<b>Miyaad isqabteen qof aan ahayn aabbaha ilmaha dhalay markii ilmahani uu caloogalay ama uu dhashay?</b> <input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya Haddii ay haa tahay, aabbaha aad hadda is qabtaan/aad isqabi jirteen waa in uu isna xareeyo Caddaynta Sayga Aan Aabaha Ahayn (Form DHS-3159C) hal sano gudihii dhalashada ilmahan si diiwaanka dhalashada ilmaha loo geliyo magaca aabbaha dhabta ah.				
<b>Aabaha</b>	MAGACA HORE	MAGACA DHEXE	MAGACA DAMBE	DARAJADA	TAARIKHDA DHALASHADA (mm/dd/yyyy)
	GOOBTA DHALASHADA(magaalada/gobolka)		LAMBARKA SOOSHAL SIKUURADKA	LAMBARKA TALEFOONKA (ikhtiyaari)	
	CINWAANKA BOOSTADA		MAGAALADA	GOBOLKA	LAMBARKA BOOSTADA

## Marka aan saxiixo Aqoonsiga Waalidnimo, waxaan ku dhaaranayaa ama caddaynayaa dhammaan waxyaabaha soo socda:

- Waxaan ahay waalidka dhabta ah ee ilmaha kor ku magacaaban.
- Xuquuqda, mas'uuliyadaha, cawaaqibta sharciga iyo cawaaqibta kale ee la xiriiirta Saxiixidda foomkan sida lagu qeexay bayaanka Waalidka, Ka-tanaasulka Xuquuqda iyo haynta iyo qaybaha foomkan ee macluumaadka wakhtiga haynta waalidnimada ee foomkan ayaa la iigu sharraxay hadal ahaan iyo/ama qoraal ahaan oo waan fahmay oo aan aqbalayaa.
- Sida ugu fiican ee aan ogahay, dhammaan macluumaadka kor ku qoran waa run waana sax.
- Waxaan fahamsanahay in aan xaq u leeyahay baadhitaanka hiddaha. Haddii aanan sameynin(la iga qaadin) baaritaanka hiddaha, waxaan hubaa in aabbaha kor ku qoran uu yahay aabbaha dhabta ah ee ilmaha.
- Waxaan fahamsanahay in Saxiixidda foomkan aanu aasaas u noqonaynin haynta ama waqtiga waalidnimada iyo in hooyadu ay keligeed leedahay hayshada ilmaha illaa ay maxkamad xukun kale samayso.

- Waxaan fahamsanahay in Saxiixidda foomkan uu u ogolaanayo maxkamada in ay dalbato masruufka ilmaha.
- Aniga ayaa si ikhtiyaari ah u saxiixaya foomkan ujeedada oo ah aasaasida aabonimada ilmahayga iyo hubinta in labada waalid ay ku qoran yihiin diiwaanka dhalashada ilmahayga.
- Waan fahamsanahay in aan xaq u leeyahay in aan ka noqdo Aqoonsigan Waalidnimo 60 maalmood gudahood. Waan fahamsanahay in aan ka noqon karo Aqoonsiga Waalidnimo iyada oo aan ku hor saxiixayo ka noqosho qoraal ah nootaayada dadweynaha ( notary public) oo aan u diri Waaxda Caafimaadka Minnesota, Xafiiska Diiwaanada muhiimka ah. Waan fahamsanahay in haddii Aqoonsiga Waalidnimo aan laga noqon 60 maalmood gudahood, waxay leedahay awood iyo saamayn la mid ah amar maxkamadeed oo aasaasaya aabonimada, waxayna u baahan doontaa amar maxkamadeed si loo joojiyo/looga noqdo.

Saxiixa hooyada x \_\_\_\_\_

Saxiixa aabaha x \_\_\_\_\_

<b>NOTARY PUBLIC</b>	In the state of _____, County of _____									
	Signed and sworn/affirmed to before me this (mm/dd/yy):									
	<table border="1"> <tr> <td> </td><td> </td><td> </td> <td> </td><td> </td><td> </td> <td> </td><td> </td><td> </td> </tr> </table>									
_____ Notary Public Signature										

<b>NOTARY PUBLIC</b>	In the state of _____, County of _____									
	Signed and sworn/affirmed to before me this (mm/dd/yy):									
	<table border="1"> <tr> <td> </td><td> </td><td> </td> <td> </td><td> </td><td> </td> <td> </td><td> </td><td> </td> </tr> </table>									
_____ Notary Public Signature										

## Waalidka caddayntiisa

Waxaan ku dhaaranayaa/xaqiijinayaa in:

- In la ii sheegay waxa ku saabsan foomka Aqoonsiga Waalidnimo iyo aan fahamsanahay xuquuqdayda iyo masuuliyadahayga iyo aan ka tanasulay marka aan foomkan aan saxiixay.
- Waxa aan haysa koobiga Ahaanshaha Aabbaha Sharciga: Macluumaadka waalidnimo ee hooyooyinka iyo aabbayaasha (DHS-3159A-SOM). Buuggan waan aqristay ama qof kale ayaa aniga ii aqriyay.
- Waxaa la isiiyay ogaysiiska dheeraada ee ka hadlaya waxa ku saabsan xuquuqyada, mas'uuliyadaha iyo wax kale saxiixidda foomkan.
- Waxa aan fahamsanahay in midkeemba uu dooran karo in uusan aqoonsan aabbanimada. Wax ka duwan saxiixitaanka Aqoonsiga Waalidnimo, midkeemba waxa uu maxkamada weydiisan karaa in ay go'aamiso aabbanimada waqti dambe.
- Waxa aan caddaynaynaa in aan nahay waalidka dhabta ah ee canugga ku magaacaban foomkan Aqoonsiga Waalidnimo.
- **Waxaan fahamsanahay in Aqoonsiga Waalidnimo uusan siin haysasho ama booqasho waalid aabbaha dhabta ah.** Haseyeeshee, Aqoonsigan Waalidnimo wuxuu aabbaha xaq u siiyaa in uu maxkamad waydiisto haysasho ku-meel gaar ah ama joogto ah iyo/ama booqashada waalidka.
- Haddii aan saxiixo Aqoonsiga Waalidnimo oo aan raadiyo amar maxkamadeed ee haysasho, waaan garanayaa in Sharciga Minnesota Cutubkiisa 518 (Minnesota Statutes Chapter 518), in aan run la isaga qaadan karin helidda iyo waayidda haynta qofka marka laga reebo kiisaska ku saabsan xadgudubka guriga ee waalidka ka dhex dhaca.
- Waxa aan fahamsanahay in midkeemba uu qaadan karo tallaabada lagu dhisayo waalidnimada halka lagu saxiixi lahaa dukumiintiga Aqoonsiga Waalidnimo iyo in midkeemba uu dalban karo adeegyada dhisitaanka aabbanimada ee ka dhacaya xafiiskeena masruufka caruurta.
- Waxa aan fahamsanahay in midkeemba uu dooran karo in laga qaado tijaaba unugyada dhaxalka la qabo in aanan saxiixin documiintiga Aqoonsiga Waalidnimo.
- Waxa aan qaadaa masuuliyadda lagu bixinayo taageerada dhaqaalaha ee la siinayo canuggayga. Waxa aan fahamsanahay in ay maxkamadi amari karto dhaqaale ah masruufka caruurta oo ay ku jirto lcag- bixinta aasaasiga, taageerada caafimaadka iyo daryeelka caruurta laga soo bilaabo markuu canugaygu dhashay ama laba sano markii la bilaabay talaabada sharciga ah, midkoodii horeeya, soconayana ilaa ay maxkamadi joojiso taageerada.

- Waxaan fahamsanahay in taageero dhaqaale ay iyana ka mid noqon karaan waxyaabahan soo socda: Lacag-celinta kaalmada bulshada ee loo bixiyay nafaqada canuggayga, lacag-celinta kharashka muddada uurka iyo umulidda ee la xiriira dhalashada cannugayga/canugtayda, lacag-celinta wixii la xiriira tijaabada unugyada dhaxalka ee dawladdu bixisay.
- Waxa aan fahamsanahay in labada waalidka ay xaq u leeyihiin ogaysiisyada ku saabsan dhageysiyada kasta ee ilmaha lagu korinayo.
- Waxa aan fahamsanahay in kan uu yahay dukumiinti sharci ah. Haddii labadeenuba aan jirno 18 ama aan ka weynahay marka aan saxiixno foomkan, in Aqoonsiga Waalidnimo uu la mid yahay amar maxkamad ee go'aaminaya in uu jiro cilaqaad u dhaxeya aabbaha iyo canugga.
- Waxa aan fahamsanahay in haddii midkeemba uu ka yar yahay 18 sanadood marka aan saxiixayno foomkan, Aqoonsigan Waalidnimo in uu yahay run u qaadasho aabbanimada oo kali ah. Ma aha kii kama dambaysta. Waan fahamsanahay in aan haysto lix bilood marka midkayaga ugu yari uu noqdo 18 jir in aan qaado talaabo sharci ah si loogu dhawaaqo in uusan jirin xiriir aabe iyo canug.
- Waxa aan fahamsanahay in midkeemba uu meesha ka saari karo Aqoonsiga Waalidnimo ayado qoraal lagu dhahayo "Dib ayaan ula noqonayaa Aqoonsiga Waalidnimo" Waan fahamsanahay in layga rabo in aan ka noqoshada ku hor saxiixo nootayada dadweynaha horteeda iyo in aan aan dib u noqoshada ka diiwaan geliyo Office of Vital Records (Xafiiska Diiwaanka Muhiimka) muddo 60 cisho gudahooda kadib marka dhammaystiro foomkan. Haddii aan diiwaan gelin dib uga noqoshada muddo 60 cisho gudahood ah, waxaan fahamsanahay in Aqoonsigan Waalidnimo uu yeelanayo awood iyo saamayn la mid ah amar maxkamadeed ee sugaya aabanimo. Haddii wali aan rabo in aan buriyo Aqoonsiga Waalidnimo 60 kaa maalmood ka dib, waxaan fahamsanahay in aan u baahnahay in aan qaado talaabo sharci ah oo codsado in maxkamaddu beddesho macluumaad kasta oo ku jira Aqoonsiga Waalidnimo kuwaas oo maxkamaddu yeeli karto ama diidi karto.
- Waxa aan fahamsanahay in Aqoonsiga Waalidnimo uusan noqon doonin mid rasmi ah haddii hooyada canuggu ay nin kale qabtay waqtigii uu calool galay ama dhashay ilaa Aqoonsigan Waalidnimo la diiwaan geliyo iyada oo uu la socdo Caddaynta Sayga Aan Aabaha Ahayn (Spouse's Non-Paternity Statement).
- Aniga oo garashadayda ugu fiican isticmaalayaa, macluumaadka ku qoran foomkan waa run.
- Waxa aan foomkan u saxiixayaa aniga oo raalli ka ah. Ma jirto cid igu qasabtay in aan foomkan Aqoonsiga Waalidnimo saxiixo.

## **Ka tanasulka xuquuqda**

Marka aan foomkan Aqoonsiga Waalidnimo ee Raaliga Laga Yahay ee Minnesota (Aqoonsiga Waalidnimo) aan saxiixayo (DHS-3159), waxa aan ka tanasulayaa xaqa ah:

- Ka qayb qaato arrimaha ku saabsan aabanimada, iyadoo aan qareen wakiil iga ahayn
- Dacwad maxkamad ee lagu caddaynayo haddii aabbaha uu yahay aabbaha dhabta ee canugga
- Marqaatiyal lagu dhaariyo dhageysiga aabbanimada
- Ka marqaatifuro yaa ah aabbaha dhabta ee dhageysiga aabbanimada.

## **Macluumaadka haynta iyo waqtiga booqashada waalidka**

Marka uu canugga ka dhasho waalid aan isqabin sharciga waxa uu hooyada siinaya haynta canugga. Haddii labada waalid midkood uu doonayo hayn ka duwan taas, waalidku waa in ay maxkamad tagaan.

Fadlan la xiriir qareen haddii aad su'aalo qabtid.